








# Ku soo-dhowoow Degmada Köping!

Halkani waxaa ku qoran warbixin, loogu talagalay qofka adigoo kale ah oo dalka Iswiidan iyo Degmada Köping ku cusub.

Somaliska

KÖP!NG

# Hordhac

Ku soo-dhowoow Degmada Köping!
Waanu ku faraxsan nahay go'aankii, aad ka gaartay degmadii aad ku noolan lahayd, kaasoo noqday degmadaynna, waxaana rajeynayna inaad ka heli doonto.

Haddii aad goor dhow dalka Iswiidan timi, hab fudud oo wanaagsan kuma heli kartid aqoon xiriir la leh bulshada cusub iyo sida aad ula qabsan lahayd. Waxaa laga yaaba inaad is-waydiinayso su'aallo badan, kuwaasoo u baahan inaad hesho jawabtooda. Tusaale, sidee shaqo ama waxbarsho lagu hela ama hoygii aad ku noolaan lahayd?

Qoraal-warbixineedkaan waxaad ka aqrisan karta, warbixin ku saabsan waxyaalaha Dowladda hoose degmada Köping iyo dalka Iswiidan u ka caawin karo.

Waxaan ku rajeynaynaa inaad Degmada Köping ka heshid noolol heer sare ah!

Ku soo-dhowoow!
Elizabeth Salomonsson
Guddoomiyeha Golaha Dowladda hoose



Elizabeth Salomonsson, xildhibaan oona ah Guddoomiyeha Golaha Dowladda hoose iyo David Schanzer-Larsen, ku-simaha madaxa Dowladda hoose, waxay taagan yihiin albaabka Dowladda hoose.

# Shaqaysashada iyo waxbarashada

## Dugsiyada

Carruurta dugsiyo kala duwan ayay dhigtaan hadba da'dooda:

- Carruurta da'dooda u dhaxayso 1 ilaa 5 sano, waxaa lagu xannaanadeeya dugsiyada xannaanadda.
- Carruurta da'dooda ka wayn 6 sano waxay dhigtaan Fasalka dugsiyada xannaanadda.
- Carruurta da'dooda u dhaxayso 7 ilaa 16 sano waxay dhigtaan Dugsiyada biloowga/hoose/dhexe.
- Carruurta dhigata laga bilaabo sannad-dugsiyeedka 1 ilaa 3, waxay tagaan goobaha wakhtilummiska. Halkaas ayay ku sugnaan karaan saacadaha dugsi dhigasha kahor iyo kaddib ba.
- Carruurta dhigata laga bilaabo sannad-dugsiyeedka 4 ilaa 6 Dugsiyada biloowga/hoose/dhexe, waxay ka qaybgalaan dhaqdhaqaaqa wakhtilummiska albaabada u furan. Cunugga halkaas ayuu ku sugnaan karaa saacadaha dusgi dhigashada kaddib. Waxaa kalo jiraan goobaha wakhtilummiska oo loogu talagalay carruurta da'dooda u dhaxayso 12 ilaa 18 sano.

Waa in ubadkaaga ku qorta dugsiyada iyo goobaha wakhtilummiska.

## Waxbarashada dadka waawayn loogu talagalay

Xarunta [Kompetenscenter] ee Degmada Köping, waxaa laga hela barashada luqada iswiidishka ee soo-gaaleetiga loogu talagalay (SFI). Waa waxbarasho loogu talagalay dadka waawayn, oo u baahan in af-iswiishka ay bartaan. Adigoo adeegsanaayo shabakadda internetka Dowladda hoose Degmada Köping ayaa isku qori karta barashada luqada iswiidishka ee soo-gaaleetiga loogu talagalay (sfi).

## Shaqo

Xafiiska Shaqada [Arbetsförmedling] waxaad ka heli karta warbixin ku saabsan sida shaqada loo raadsado. Hawlwadeneyada Xafiiska Shaqada waxay ka caawini karaan sida loo buuxiyo foomamka shaqada lagu codsado.

Qofka adigoo kale ah oo ku nool kaalmo-dhaqaaleed, waxaad la xiriiri karta [Jobbcenter]. Hawlwadeneyada [Jobbcenter] waxay ka caawini karaan sidii aad shaqo ku heli lahayd ama ku bilaabi lahayd waxbarasho.

## Guryaha Degmada Köping

Siyaabo badan ayaa hoy Degmada Köping looga hela. Haddii aad hoy baadigoobayso waad kireysan karta ama iibsan karta.

Haddii aad ku talo jirto inaad kireysato, waa inaad is diiwan gelisa inaad u baahan tahay guri aad kireysato. Waxaad la xiriiri karta shirkadaha guryahay laga kireysto. Haddiise aad ku talo jirto inaad iibsato la xiriir shirkadaha guryaha dalaala.

Shabakadda internetka Dowladda hoose Degmada Köping waxaad ka heleysa warbixin ku saabsan shirkadaha guryaha laga kireysto ee ka hawlgala degmada.

## Dhaqamada iyo wakhtilummiska

Degmada Köping waxaa ka yaalaan ururro tiro badan, kuwaasoo xubin ka noqon kartid. Haddii aad xiisayso isboortiga ama fanka waxaa laga yaaba, inaad degmada ka hesho urur noocaas ah.

Halka lagu dabaasho waxaad ku baran karta qaabka loo dabaalado. Goobtaas waxaa u degsan nidaamyo, kuwaasoo laga filanaayo inaad tixgeliso.

Maktabadda waxaad ka amaahan karta buugag. Waxaa ku amaahan karta kaarka buugagga lagu amaahdo. Kaarka noocaas ah waa lacag la'aan, waxaana ka codsan karta maktabadda.

## Haddii xaalad halis ah ay jirto

Haddii u dab kaco, aad hab degdeg ah u xannuunsato ama u baahato caawinaadda ciidanka booliska wac 112.

Haddii tusaale ay dhacdo, sii daynta gas halis ah, waxaa la soo dirayaa farin muhim ah. Taasoo loo yaqaanno [VMA]. Waa baaq waxaana laga maqla Degmada Köping oo idil. Baaqa ugu horeeyo waxaa la maqli kara 7 ilbiririqsi kaddib ammusnaan oo ah 14 ilbiririqsi. Kaddib haddana sidii ayaa baaqa loo maqlaya.

Markii aad baaqa VMA maqasho:

- Gudaha gal
- Xir dariishadaha, albaabada iyo valvoleyaasha oo idil
- Sida aad warbixin dheeraad ku hesho awgeed, dhagayso Radio Sweden kanalaha P4 ama telefishanka degmada.

Hab-shaqaynta baaqaVMA waxaa la tijaabiya bilaha maarso, juunyo, setembar iyo diseembar. Waxaa la tijaabiya markii saacadda ay ku beegan tahay 15.00 maalinta isniinta ee ugu horeeyso bisha.

## Qodobada muhimka ah

### Dimuqraati

Dalka Iswiidan waa dal mab'aadida dimuqraati ku dhaqma. Qofka ku nool wadan dimuqraati ah, wuxuu xaq u leeyahay in uu aragtidiisa bandhigo. Laakiinse, qofku waxaa waajib ku ah in isaguna u ixtiraam u muujiyo aragtida qof kale.

Afartii sano ba doorasho ayaa dalka Iswiidan ka dhacda. Dadwaynaha dalka ku nool waxay markaas helayaan fursad ay ku doortaan xildhibaanada gaari doono go'aanada dalka ugu muhimsan. Muwatinyiinta dalka Iswiidan waxay u codaynayaan xisbiyo iyo shaqsiyaad kala duwan. Dadyoowga markaas la doorto ayaa ah siyaasiyiinta. Go'aanada Goleha Dowladda hoose, Goleha Gobalka iyo barlamaankda dalka iyaga ayaa gaara.

### Canshuur

Qof kasta oo dalka Iswiidan ka shaqeeya waa in u canshuur bixiya. Daqliga canshuurta waxaa lagu bixiya kharashyda sugidda dadwaynaha bulshada. Kharashyadaas waxaa kamid ah kaalmo-dhaqaaleedyada, daryeel-caafimaadeedka iyo bukaanka iyo kaalmo-dhaqaaleedka kirada.

### Diiwangelina dadwaynaha

Dhammaan dadka dalka Iswiidan ku nool waa la diiwan geliya. Qof kasta oo la diiwan geliyay waxaa la siiya tobban lambar oo isaga u gaar ah [personnummer]. Tobbanka lambar waxay ka koobsan yihin taariikhda u qofku dhashay iyo afar lambarro. Qofka adreeskiisa ka guuro, magaciisa iska beddeli ama guursado waa in uu hey'adda diiwangelinta dadwaynaha [folkbokföringen] wargeliya.

## Hey'adaha dowladda ee ugu muhimsan

### Khasnadda caymiska bulshada (Försäkringskassan)

Försäkringskassan waxay kaalmo-dhaqaaleed siisa dadka u baahan in dhinaca dhaqaalaha laga caawinno. Lacagta noocaas waxaa loo yaqaanna [bidrag]. kaalmo-dhaqaaleedka waxaa tusaale ahaan la bixin kara markii qofku u xannuunsado ama u baahan yahay caawinaad maadaama dhowaan u dalka u soo guuray.

### Hey'adda canshuuraha (Skatteverket)

Hey'adda canshuuraha waxay maamusha arrimaha canshuuraha ee dalka Iswiidan laga bixiyo. Hey'adda waxay kaloo maamusha arrimaha diiwangelinta dadwaynaha. Qofka dalka Iswiidan ka diiwan gashan wuxuu Hey'adda canshuuraha ka dalban kara kaarka aqoonsiga [ID-kort].

# Sababta anaga aan Degmada Köping u dooranay waxay tahay

## Inas Al-Lami & Ali Sellman

Inas Al-Lami iyo Ali Sellman waa laba lamaaneyaal is-qaba oo ah takhtarrada caafimaadka ilkaha. Waxay leeyihiin afar carruur, waxay ku wada nool yihiin guri ku yaallo Degmada Köping. Ali ayaa dalka Iswiidan ku soo horeeyay, wagaas wuxuu qol ka kireysan jiray qof ay saaxiib ahaayeen. Wuxuu bilaabay in u guri raadsado markii xubnaha qoyskiisa ay dalka yimaadeen. Waxay ka baadigoobi jireen xayeeysiinada iyo dadka ay la kulmi jireen.

– Waxaan booqan jirnay shirkadaha guryahay laga kireysto, waxaana ugu skeekayn jirnay nooca guriga aan baadigoobaynay, ayay Inas tiri.

Inas iyo Ali waxbarasho ayay af-iswiidishka ku barteen. Inas waxay dhigan jirtay dugsiga barashada luqada iswiidishka ee soo-gaaleetiga loogu talagalay (sfi). Ali wuxuu luqada ku bartay dugsiga luqada lagu barto ee Migrationsverket qabanqaabiso. Isla xilliga ay afka baranaayeen waxay tababar luqadeed ku qaadan jireen rugta daryeel-caafimaadeedka ilkaha.

– Tababarka luqada ayaa af-iswiidishka lagu barta, maxaayeelay maalintii oo idil ayaa luqada ku hadlaysa. Xasuus-qor ayaan qoran jiray, wax kastana fiirogaar ayaan siin jiray, ayay Inas tiri.

Ali wuxuu yiri af-iswiidishka waa furaha lagu galo bulshada dalka Iswiidan. Wuxuu kaloo yiri waa in qofku u aaminsan yahay in is-dhexgalka u suurtagal noqon karo.

– Dheg ha u dhigin kuwa aaminsan in taasi ay suurtagal noqon karin. U halgan sidii aad luqada ku baran lahayd, ayuu Ali yiri.



Inas Al-Lami iyo Ali Sellman labadooda ba waa takhtarrada daryeela caafimaadka ilkaha, xirfadaas-na ayay ku shaqaystaan

## Naseexooyin loogu talagalay qofka ku talo jiro in u af-iswiidishka barto

- Af-iswiidish ama af-ingriisi ku daawo telefiishanka oo laakin erayada af-iswiidish oo qoraal ah ku turjuman.
- Buugagga ku aqriso af-iswiidish.
- Adigoo adeegsanaayo webka aqriso wargeysyada ku qoran af-iswiidish.
- Ku dadaal sidii aad ku heli lahay tababar luqadeed.
- Qofka la hadlayso ka codso in uu ku saxo haddii aad si qalad ah af-iswiidish ugu hadasho.
- Mar kasta ku hadal af-iswiidish, xitaa markii aad la hadlayso soomaalida.
- Booqo makhaayadaha luqada lagu barto.
- Codso in lagu yeelo saaxiib-luqadeed.

## Faahfaahinta xiriirka

Degmada Köping, lambarka taleefanka: 0221-250 00

www.koping.se

Booqo shabakadda internetka ee Dowladda hoose Köping! Waxaad halkaas ka aqrisan karta warbixin dheeraad ku saabsan dhaqdhaqaaqa Dowladda hoose. Waxaa kalo isla goobtaas laga aqrisan kara warbixin ku saabsan sida qofku ma ubadkiisa ugu qori karo dugsi ama dhaqdhaqaaq.

### Shabakadaha internetka kale ee muhimka ah

www.informationsverige.se

www.arbetsformedlingen.se

www.skatteverket.se

www.forsakringskassan.se





KÖPINGS
KOMMUN